

### **Wada-xiriirka Bulshadeed**

Xirfadda xaga la xiriirka ubadka waxaa si wanaagsan loogu horumarin karaa marka uu ubadka la dhaqmo dadka kale.

Isku day inaad;

#### **1. Ku dhiirigelisid ubadkaaga inuu kula ciyaaro.**

Fiira gaar ah sii alaabta lagu ciyaaro(toys)/ciyaarta uu ubadkaagu jecelyahay. Fiiri falalka dhacaaya. La ciyaar ubadkaaga, isla markaasina kala hadal waxaad sammeyneysid iyo waxaad arkeysid adigoo isticmaalaaya luqad ama erayo fudud.

#### **2. Ku caawi ubadkaaga inuu ka qayb qaato ciyaarta markiisa.**

Taasi waa bilowga isdhexgal bulshadeed oo dhexmara ubadkaaga iyo qof kale. Heesa heeso. Haddii ubadkaaga uu yaqaano heeso, u kaadi, kuna dhiirigeli inuu buuxiyo wixii markaa ku xiga. Ciyaar kubbad. Isku tuura kubbadda qof waliba markiisa.

#### **2. Ku dhiirigeli ubadkaaga inuu ku fiiriyo.**

Wakhtiga ciyaarta waxyaabaha la qabto maalin kasta, kor u qabo shay (alaab) la sin wajigaaga, una sheeg ubadkaaga magaca shayga.

Xusuusnow, xitaa, ka hor inta caruurta aysan ku dhawaaqin ereyada, waxaay u sheegaan sababo kala duwan oo ay ku jiraan:

- “weydiin” wax badan
- “weydiin” shay
- “dhihid” see tahay/nabadgelyo
- “magacoow”